

Su'aalaha iyo Jawaabaha ku taxluqa MCA ee Aqrinta, Xisaabta, iyo Sayniska

Waa maxay MCA?

Baahida Qiimaynta Cilmiyeed ee Minnesota (Comprehensive Assessments - MCA) waa imtixaammada aqrinta, xisaabta, iyo sayniska ee loo isticmaalo qancinta shuruudaha fderaalka iyo sharciga gobolka. Imtixaanka waxaa la maamulaa sannad walba si lagu cabbiro wax-soosaarka ardayga ee la xiriirta Heerarka Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Academic Standards) kuwaaso qeexaya waxa laga rabo in ardayga ka yaqaanno darajo cayiman iyo awoodo in uu sameeyo.

Maxaannu u bixinnaa imtixaamadaan?

Waxaannu u isticmaalnaa MCA si aannu ku ogaanno sida ugu fiican oo ay dugsiyadu isugu toosiyaan manhajka iyo ugu diyaariyeen ardada Heerarka Waxbarashada ee Minnesota ee ku aaddan aqrinta, xisaabta, iyo sayniska. Qiimaynada aqrinta, xisaabta iyo waxaa kaloo laga isticmaalaa cabbiryada/halbeegga masuuliyadda dugsiyada federaalka iyo gobolka.

Dugsiyadu waxa ay macluumaadka u isticmaalayaan si ay u hagaajiyaan waxbaridda fasalka iyo waxbarashada. Baareyaasha iyo maamuleyaasha waxa ay eegayaan meelaha ay ardadu ku fiicanyihiin si ay markaasi xoog u sii saaraan baritaanka xirfadahaan. Waxa kale oo ay eegayaan meelaha u baahan in culays la saaro si markaasi ay u kordhiyaan waqtiga ay wax ku barayaan ama baddalaan qaabka waxbariddooda.

Yay shardi ku tahay in ay imtixaamadaan qaataan?

Ardada idil ee dhigata dugsiyada guud waxaa laga rabaa in ay ka qaybqaataan barnaamijka qiimaynta waxbarashada ee gobolka oo idil. Imtixaamada aqrinta iyo xisaabta waxaa lagu maamulayaa darajooyinka 3-8 iyo dugsiyada sare (ardada darajada 10 waxa ay qaadanayaan Akhriska MCA, iyo ardada darajada 11 waxa ay qaadanayaan Xisaabta MCA). Sayniska MCA waxay ku maamushaa ardayda darajooyinka 5 iyo 8 iyo darajada dugsiyada sare marka ardayda qaataan maddooyinka sayniska noolaha ama bay'oolojiga. Marka laga reebo xaalado gaar ah, ardada dugsiyada guud oo idil ee darajooyinka sare ku jira waxa ay qaadanayaan MCA.

Ardada haysata Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyadeed (IEP) ama qorshaha 504 waxa ay xaq u yeelan karaana haqabtiryo. Ardada qaarkood ee qaba naafonimada ba'an waxa ay xaq u yeelan karaan in ay qaataan Imtixaamka Xirfadaha Waxbarashada ee Minnesota (MTAS) booska MCA. MTAS waa qiimayn duwan ee heerarka horumarka duwan ee aqrinta, xisaabta, iyo sayniska. [Ka eeg Shuruudaha U-Qallmida MTAS shabakadda internetka MDE wixii macluumaad gaara.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Minnesota Tests.)

Sidee imtixaamada loo qaadaa?

Darajooyinka oo idil ee Akhriska, Xisaabta iyo Sayniska MCA waxaa lagu qaadayaa internetka oo keliya. Imtixaamka warqadaha lagu qaadanayo waxaa loo diyaarshay oo keliya aradada xaqa u yeeshay, oo ay ku jiraan daabacad farta waaweyn iyo qoraalka camoolaha.

- Aqrinta Onleenka iyo Xisaabta waa imtixaan la qabsi leh, taaso macnaheeda ka dhigantahay in imtixaanka uu saxayo jawaabaha arday walba.
- Aqrinta, imtixaanka wuxuu saxaa heerka gudubka, si markaas jawaabaha ardayga ay u hagaajiyaan sheeyada gudubka ee go'aan looga gaarayo gudubyadakooxda xigta iyo sheeyada ardayga uu helayo.

Wixii xisaabo ah, markasta oo u arday su'aal ka jawaabo, jawaabteeda ama jawaabtiisa waxay gacan ka geysanaysaa go'aan ka gaarista su'aasha xigta ee uu ardayga ka jawaabi doono.

Siiday ardadu ugu diyaargaarobaan imtixaamadaan?

Warqadaha “Talooyinka U Diyaargarowga Imtixaamka ee loogu talagalay Waalidka iyo Bareyaasha” ayaa laga helayaa shabakadda internetka ee MDE ayadoo ay la socdaan nasexooyin waxa ku jira xeeladaha cashar-diyaarinta iyo imtixaan qaadashada. [Eeg warqadda tasmada ee Isu Diyaarinta Imtixaamka ee ku taalla shabakadda internetka MDE](#). (Gal qeybta Students and Families > Statewide Testing.)

Saamballada cashar-bareyaasha waxa ay ardada ku caawinayaan in korka ka bartaan qaabka imtixaamka iyo noocyada su'aalaha imtixaanka ku jiro. Casharada ardayga ee imtixaanada onleenka waxay ku siinayaan warbixinta sida loo isticmaalo qalabka onleenka iyo sharaxaadda jaheynta iyo noocyada sheeyada. [Gal qaybta bogga tusaalooyinka sheyga ee websaydka MDE wixii warbixin ah ee gelitaanka tusaalooyinka sheyga iyo casharada ardayga](#). (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Statewide Testing > Item Samplers.)

Maxaa loo baahanyahay si imtixaamka looga gudbo?

Ardada kuma gudbayaan ama kuma dhacayaan imtixaamada akhriska, xisaabta, ama sayniska. Maadaama imtixaanada xisaabiyo waxqabadka ardayga ee la xiriirta Heerarka Waxbarashada Minnesota, arday kasta waxa uu helayaa buundo galaysa mid ka mid ah affartaan heer ee horumarka cabbiraya—Ma Qancin Heerarka, Qaybahaan U Qanciyay Heerarka, Qanciyay Heerarka iyo Ka Sare Maray Heerarka.

Waa kuwee xirfadaha lagu qiimaynayo MCA?

MCA waxa ay cabbiraysa wax-soo-saarka ardayga ee Heerarka Waxbarshada ee Minnesota. [Eeg Heerarka Waxbarashada ee Minnesota ee ku yalla shabakadda internetka ee ee MDE.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Academic Standards K-12.)

- Akhriska MCA waxa uu u dhigmaa heerarka waxbarshada ee 2010.
- Xisaabta MCA waxa ay u dhigmaa heerarka waxbarshada ee 2007.
- Sayniska MCA waxa uu u dhigmaa heerarka waxbarshada ee 2009.

Sideen ku arki karaa natiijooyinka MCA ee canuggayga, dugsiga iyo degmada?

Degmada dugsigada waxa ay heli doontaa warbixinta shaqasiyadeed ee canug kasta ee qaatay MCA waxayna macluumaadkaan u direysaa waalidka iyo ilaaliyeyaasha. Warbixintaan waxa ay muujinaysaa buundooyinka canuggaaga ee maaddo kasta, iyo xitaa buundooyinka xirfadaha qaaska ee qayb kasta ee maadda ku jira. Waxaa ku jira macluumaad ku taxluqa heerka horumarka, barbardhigyada kooxaha kala duwan iyo barbardhigyada ardayga wax-soo-saarkiisa ee sanadihii la soo dhaafay, marka lagu dabbaqi karo.

Natiijooyinka dugsiga iyo degmada waxaa la dhigay Kaarka Warbixinta ee Minnesota qaybta Data Center ee shabakadda internetka MDE. [Gal qaybta Warbixinta Bajeellaha ee Minnesota ee ku yallaa shabakadda internetka ee MDE.](#) (Gal qaybta Data Center > Minnesota Report Card.)

Wixii macluumaad dheeraad ah, la soo xariir:

Statewide Testing
mde.testing@state.mn.us

Minnesota Department of Education
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
<http://education.state.mn.us>

Siibteembar 2016